**MA DOORASHAA DANBI AH MISE DASTUUR? QEYBTII 2AAD.**

Qeybtii 1aad waxaan uga soo hadalnay ereyga hore ee doorasho kanna waxaan ku eegi doonna ereyga kale ee dastuur.

Erey bixintiisa waxay ku sheegaan “Heshiis bulsho oo dad ka dhexeeya” Waxaana lugu qayaxaa “Ku heshiin wadaagid iyo kala lahaansho awoodaha iyo kheyraadka” Tani waa qayaxaadda ugu kooban uguna fudud marka la turjumo, maadaama uusan erygu af-somali ahayn, al.muhim waa ujeedooyin qoran oo qayaxaya waxqeybsi iyo nidaam lugu kala danbeeyo.

Dastuur wuxuu xiriir toos ah la leeyahay dabeecadda basharka ee ah noole bulshaawi ah oo isla nool, dhinaca kalena uu ku badan yahay dulmigu, taasoo aan looga maarmin nidaam kala haga. Dastuus wuu jirey xillikasta oo banii aadam joogey dastuurkaas ha qornaado ama afgarasho ha ahaado, ha saxnaado ama ha khaldanaado, noolosha dadku kuma socon karto isdhexyaac.(لا يصلح الناس فوضي لا سراة لهم ولا سراة اذا جهالهم سادوا)

Ilaahey insaanka wuxuu siiyey caqli wuxuu usoo dejiyey diin tuseysa jidka toosan wuxuuna u dhiibey talada dunida si uu u maamulo. Taasoo macneheedu yahay in insaanku uu xukunkiisa ku saleeyo diintii loo soo dejiyey, saas darteed wixii ay dad qortaan oo xeer ka dhigtaan hadduu garab maro dastuurkii samaawiga ahaa wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan waayo waxyigaa ah halbeega wax lugu cabbiro iyo saldhiga laga duulo, laakiin haduusan hareer marin ee uu isaga musallaha daba dhigto uusanna ka tillaabsan soodimaha loo jeexay wuxuu noqonaya dastuur islaami ah.

In sidaan loo kala saarana waa lama huraan si aan la isu dulsaarin arrimo aan is lahayn oo aysan arrintu noqon miro bardi duuduub ku liq. ( آفة العلم التعميم في موضع التخصيص والإطلاق في موضع التقييد)

Ilaahey wuxuu xadeeyey xuduudo aan la dhaafi karin, wuxuu dejiyey qawaacid asaasi ah, wuxuu xarrimay arrimo aan loo dhawaan karin, wuxuu fasaxay arrimo kale oo badan oo uu adoomihiisa ugu naxariistey iney ka faa,iideystaan hadaadse adigu dhigatid isbaarooyin yar yar iyo xuduud beenaad diimeesan ama caqliyesan kuma darin.

Ilaahey aadamaha wuxuu ku abuuray tidro saliim ah oo fahmi karta xaqiiqada wuxuu raga quluubtooda kusoo dejiyey cadaaladda ka hor waxyiga, wuxuu dhiirrageliyey in dadku fakaraan oo ka shaqeysiiyaan

caqliga oo ah nicmo Ilaahey ugu deeqey basharka, kuwii Nebiga csw beeniyey waxaa lugu tilmaamay caqlilaawayaal aan fakarin hadeey fakari lahaayeenna ay garan lahaayeen xaqiiqada ay diidan yihiin قل إنما أعظكم ). بواحدة أن تقوموا لله مثني وفرادي ثم تتفكروا ما بصاحبكم من جنة) سورة السبأ

Qur’aanku wuxuu marwalba la hadlaa dadka caqliga u saaxiibkaa, ereyga caqli iyo faraciisu wuxuu kusoo arooray 49 jeer halka ereyga al.albaab oo la macne ah uu ku yimid 16 jeer, waana farriin muujineysa muhiimada ay leedahay isticmaalka maskaxda fiyow si qofku uga faa’iideysto mishinka weyn ee ku rakiban ee ka duwaya xayawaanaadka kale.

Saas darted ayuu dastuurka samaawiga dadka u fasaxay iney ka tashadaan ayna maareeyaan mashaakilka iyo baahida iyaga haysata maadaama ay aad u garanayaan xaalka aduunka waataan soo sheegney xadiith-kii Nebiga csw. ) أنتم أعلم بأمور دنياكم)

Waana mandate ay dadku haystaan awood ay ku meel mariyaan maamulka dhulka.

Waxaan kaloo soo sheegney xadiith-kii kale.الخ(الصلح جائز بين المسلمين )

Wuxuu tilmaamayaa wixii ay muslimiintu kala qortaan ku heshiiyaan isku afgartaan iney tahay wax banaan waana intaas waxaan ula jeedno dastuur, laakiin hashii maqaarka diideysa meel ay ku xoqoto ma weydo.

Waxaan soo sheegney in dowladnimada ay saldhig u tahay wadatashi ama shuuro, wixii shuurada kasoo baxa hadii la qoro isagoo qodobeysan wuxuu noqonayaa dastuur waana intaan ka hadleyno, laakiin ninkii meeli u cadahay meeli ka modoow. Mise waxaa ceeb ah in la qoro saan ognahay Islaamku wuxuu amray in la qoro arrimaha muhiimka ah, sida deynta, dardaaranka, ganacsida, meherka heshiisyada iwm.

Diintu waxay u timid keenista maslaxada iyo qaadista dhibaatada. جلب المصلحة ودرء المفسدة

Waxay u timid ilaalinta qofka diintiisa, naftiisa, maalikiisa, sharaftiisa iyo caqligiisa, saas darted ayey culimadu dheheen meeshii maslaxadu gasho ayey diintii jirtaa. قال إبن القيم أينما تكون مصلحة الخلق فثم شرع الله.) اعلام الموقعين. )

Nebgu csw markuu ciidan dirayo wuxuu siin jirey dardaaran dheer waxaana ka mid ahaa xadiith-kii Bureyda rc ee dheera aan soo qaadanno qeybta mowduuca khuseysa.

(واذا حاصرت أهل حصن فأرادوك أن تنزلهم علي حكم الله فلا تنزلهم علي حكم الله ولكن أنزلهم علي حكمك فإنك لا تدري أتصيب حكم الله فيهم أم لا.) رواه مسلم.

Saxaabadaas wuxuu Nebigu csw xaq u siiyey iney dadaalaan oo xukun gaaraan dadkaasna ku xukumaan aysanna uga dhigin xukunkii Ilaahey ee ay ka dhigaan xukun qofku qaatay kuna saleysan ijtihaadkiisa iyo dadaalkiisa, sax iyo khaladna aqbali kara.

Labo arrimood oo muhiim ah ayuu xadiith-ku muujinayaa.

In qofku wax ku maamuli karo xukun isaga maskaxdiisa ka yimid.

In uusan xukunkiisa dadka uga dhigin kii Rabbi iyo aayad Qur’aan ah isaguna isu muujin wakiil samada laga soo diray ama afhayeenka diinta.

Diinteennu waxay ogolaatay ijtihaadka iyo maskaxda furan in qofka adeegsado aqoontiisa, waaya aragnimadiisa iyo caqligiisa si uu xal ugu helo mashaakilka haysta bulshada, ijtihaadka qofkuna ma aha waxyi lugu khasbanyahay raacidiisa, saas darteed ayey dhammaan culimadii muslimiintu markey qoreen madaahibta iyo kutubta uu midwalba dhahayey waxaan waa ra’yigeygii wixii sax ahna ka qaata wixii khaldanna daaqada ka tuura laakiin waaqica hadda jira waa kaligii saxne kaligii muslim warkiisa lagama daba hadlee.( إذا قالت حذام فصدقوها فإن القول ما قالت حذام)

Waxaad moodaa arrimo iska caadi ah oo noolosha asaaskeedii ah in la danbiyeynayo, waxaase dhici karta in khaladku ka imaanayo fahamkaaga ee aysan ahayn in wax khaldan la sheegey. ( وكم من عائب قولاً صحيحاً وآفته من الفهم السقيم)

Inuu qofku aqbali waayo ama ka argagoxo aragtida kasoo horjeeda waxay tusineysa caqli ma dhaleys ah iyo maskaxda fadhiid ah. ( الإشمئزاز عن الإتجاه الآخر هو نوع من التبتل الفكري)

**SAAMEYNTA DURUUFTA.**

Islaamku waa diin ka turjumeysa xaqaa'iq iyo waaqic, tixgelineysa duruufaha nolosha, kala duwanaanshaha waqtiga ama meesha la joogo, lana socota casrikasta iyo hawlihiisa.

Nebiga cws marmar kala duwan ayaa la weydiiyey hal su'aal oo ah camalkee ugu fadli badan wuxuuna bixiyey jawaabo kala gadisan waayo marwalba wuxuu fiirinayey qofka su'aasha weydiiyey duruufaha haysta iyo meeshuu ku fiican yahay.

Nebiyadii Ilaahey soo direy dhammaantood towxiidka ka dib midwalba wuxuu si gaar ah u wajahayey dhibaatooyinka haystey dadkiisa, waa tarbiyo ku tusineysa in bulsho walba ay hasytaan mashaakil u gooni oo xal gaar ah u baahan.

Waxwalba oo dunida yaalla gaalo malaha muslimiintuna aduunka kama aha daawadayaal waxay lahaayeen culimo iyo mufakiriin dunida kusoo kordhiyey in badan oo ka mid ah cilmiga maanta lugu faano.

Wixii horumar ah oo dunida kusoo kordha ciddeey rabaan ka yimaadeene waa la daraaseynayaa muslimiintuna waxay ka qaadanayaan wixii anfaca si aad diin iyo aduun wax u tartid ( الجمع بين الأصالة و المعاصرة، أخذ كل قدبم صالح وترحيب كل جديد نافع، تأخذ الأصلح من مدنبة الآخرين مع الإحتفاظ بالقيم والمبادئ الإسلامية السامية والسليمة)

Si aad ugu dhaqantid diintaada adoo maanka ku haya waqtigaad joogtid.(التكيف الواعي مع معطيات العصر الحديث، للجمع بين الواجب الشرعي والواقع العملي)

Sheydaan ayaa Abuu hureyra rc baray waqtiga la akhristo aayatul kursi, Nebiguna csw wuu qirey in sheydaan run sheegey isagoo beenaale ah.

Islaamku markuu meel yimaado dadka ma dhalan badelo ee wuxuu ka saxaa wixii khalad ah wixii saxanna wuu u daayaa, wuxuu waafaqay in badan oo ka mid dhaqamadii mushrikiintii Qureysh waayo wax saxan bey ahaayeen qeyb ahaan.

Saas darteed wadaadka maanta raba inuu wax soxo waa inuu taas maanka ku hayaa dadkeennu uma baahna dhalan rogid iyo banka abuur waa shacab

muslim ah oo leh dhaqan wanaagsan waxay uu baahan yihiin in la saxo oo la wacyigeliyo si loo hagaajiyo mustaqbalkooda.

Cumar bin Khidaab rc wuxuu joojiyey axkaam sugneyd duruuf taagneyd darteed, waxaa ka mid dalqadaha furitaanka hadii sadexdaba halmar lugu dhawaaqo waqtigii Nebiga csw iyo Abukar waxaa laga soo qaadi jirey hal dalqad, Cumar ayaa arkey dadkii iney arrintaas fududeyteen saxaabadii ayuu kala tashaday ka dibna wuxuu ka dhigey in sadexduba dhacayaan si loo ilaaliyo dhaqanka bulshada iyo xuquuqdooda.

Markey dhacday macaluushii caan ka ahayd wuxuu joojiyey xadkii gacan goynta tuuga.

قال الإمام أحمد،" لا قطع في في المجاعة" (إن عمر ابن الخطاب رضي الله عنه أسقط القطع عن السارق في عام المجاعة) اعلام الموقعين لإبن القيم

Markaad umad maamuleysid waxaa ku saameynayaa duruufaha nolosha iyo baahida dadka taasoo saameyn ku leh diinta, waayo masaa'isha diinigaa qeyb isma badesho waqtikasta iyo meelkasta oo la joogo waa sideedii waa الثوابت Qeyb na waxaa saameeyaa isbadelka dunida waa المتغيرات

Saas darteed ayey duruuftu badaleysa hab maamulka iyo qaab kifirka diimeed waana waxa loo yaqaan تغير الفتوي بتغير الزمان والمكان

(ثم يفرق بين الأحكام القطعية الملزمة التي لا تتغير وبين الحلول الوقتية التي تتعلق بمصلحة معينة تزول بزوالها، وهذا الفرق هام لتوضيح أن فتاوي وإجتهادات العلماء غير ملزمة في كل العصور مهما تغيرت الظروف وإنما هي متعلقة بأحوال تدور معها حيث دارت) د. محمد سليم العوا

Waana mida keentey in imaamu shafici markuu Masar tagey uu badeley in badan oo ka mid ah fiqiguu Ciraaq ku qoray, waana wax iska caadi ah waxaana keenaya macluumaad dheeri ah oo uu qofku helo ama khaladaad uga muuqday aragtidiisii hore, hadeyse arrintu kaa noqoto arki jirey doone iyo barti yaqaan bar uma kororto waa mushkilad.

Baahidu wey sii kordheysaa markastoo dunidu horey u socoto, markastoo baahidu isbadeshana waxaa loo baahanayaa fikir cusub iyo fiqi waqtigaas ka

hadlayaa saas darteed ayuu yiri Sheikhul Islaam. قال ابن تيمية " كلما بعُد الناس عن عصر النبوة احتاجوا الي فقه الأولويات"

Tusaale, hadda waxaa qofka baahidiisa ka mid noqdey inuu haysto telefoon, internet, koronto, waraaqo aqoonsi oo uu ku safro IWM arrimahaana kama mid ahayn qofka baahidiisa waqti dhow ka hor, baahida dowladuna waxay isbadadeleysaa in kasii badan.

Hadaan kala qaadno dastuur iyo qaanuun, dastuurku wuxuu awooda saaraa arrimaha siyaasada , maamulka guud, hawl maalmeedka dowlada , awoodaha madaxda iyo hey'adaha kala duwan, xeerarka wada shaqeynta dhinacyadaas, kala qayixida shaqooyinka, waqtiga xil haynta, sida lugu yimaado jagada, sababaha xilka lugu waayi karo, miisaaniyadda dhaqaale, waxqeybsiga gobolada, kala sareynta maamul, isla xisaabtanka, astaamaha iyo dhaxalgalka umadaas, xiriirka kaala dhexeeya dunida kale IWM. Waxaasina waa iska tilmaamo maamul iyo farsamooyin shaqo. لوائح إدارية وآلية تنفيذ

Si loo kala garto shaqada booliska iyo macallinka ama tan qaadiga iyo daaciga.

Waqtigan tillaabo kasta oo la qaado waxay u baahan tahay dastuur iyo dukumiinti qoran waxaan joognaa عالم الأوراق hadaad tahay shirkad ganacsi, hey'ad waxbarasho, warbaahin, urur bulsho, iskaashato shaqaale, urur diimeed, maamul dowladeed IWM. Waxaa lugu wada shaqeeyaa warqado qoran oo la wada saxiixay waana intaas macnaha dastuurku. Waxay hoos galayaan waxa loo yaqaan المصالح المرسلة

( المصالح المرسلة في الجملة كثيرة جداً ومنها كل مستحدث عصري ينتفع به الناس من التنظيمات والتراتيب الإدارية بما لم برد فيه دليل نصي ولا يخالف الشريعة الإسلامية كسن الأنظمة المصلحية وهيكلة الدوائر الحكومية، فتنظيم أمور التقاضي وتصنيف الموظفين وتقدير رواتبهم ونحوها هي في الحقيقة أمثلة لإعمال المصالح.) موقع صيد الفوائد

Runtii wax badan baa u baahan inaan dib u fiirinno. ربما المسألة لا تحتاج الي أكثر من استعمال العقل للحظات

Wadaado Soomaaliyeed oo akhriyey axdiga KMG ah waxay sheegeen in badankiisu sax yahay uun waxyaabaha khaldan laga saxo,indhuhuse isku si wax uma arkaan maadaama ay xiran yihiin okiyaaleyaal kala duwan

قد تنكر العين ضوء الشمس من رمد وينكر الفم طعم الماء من سقم.

Haddiise laga hadlo dhicana qaanuunka cadaaladda iyo garsoorka oo khuseeya dadka dhiigooda iyo maalkooda waa meesha sartu ka quruntay inkaartuna ka dhacday, Taas waa axkaam go'an oo aan aqbali karin shushub iyo kala wareejin marka taasi waa iney ahaataa gebi ahaanba asalkeedii gaar ahaan wixii leh nas cad markastoo ay suurtagal tahay meel marinteedu meeshana ay ka baxdaa xeerka ciqaabta Soomaaliyeed oo dal iyo dadba fasahaadiyey.

**DIB U EEGIS TAARIIKHEED**:

Nebi Muxammed csw markuu Madiina tagey oo dhisey dowlad islaami tii ugu horeysey waxaa jirtey warqad caan oo uu qoray (macneheedu ma aha gacantiisu ku qoray la soco)

Warqadaas waxay khuseysey rer Madiina iyo mashaakilkooda waxay ka koobneyd afartan iyo dhowr qodob waxaa ku qoran baahida dadka iyo maamulka dowladeed oo kooban ayna u wada hogaansameen muslim iyo gaal wixii Madiina joogey.

Khubaradu waxay ku sheegaan warqadaas iney ahayd dastuurkii ugu horeyey ee qoran abid inta la ogyahay taariikhda dunida oo ilaa hadda qodobadiisii yaallaan.,

إن "الصحيفة" التي كتبت بإملاء من الرسول صلي الله عليه وسلم في العام الأول من هجرته الي المدينة مثلت السياسة الداخلية للدولة الإسلامية مع (الآخر)-اليهود والوثني- ، وكذالك مثلت نظاماً متكاملاً للعلاقات الخارجية مع . القبائل والشعوب والدول. لقد أوصل النبي صلي الله عليه وسلم بيثرب موطنه الجديد الي وحدة سياسية ونظامية لم معروفة قبل في سائرأنحاء الحجاز فأحدث ذالك التغيير من خلال "الوثيقة" التي كشفت مدي الظلم الإجتماعي الذي تعانيه يثرب قبل هجرته اليها. إن الدولة الإسلامية التي أنشأها النبي صلي الله عليه وسلم، في المدينة وفق اسلوب حضاري راق كانت لا تتعامل مع سلبيات الماضي وظلماته والعصبية القبلية والنزعة الطائفية والثأرات الجاهلية. فهو يعتبر أول تجربة سياسية إسلامية بقيادة النبي غليه الصلاة والسلام، لقد كان له دور بارز في إخراج المجتمع من دوامة الصراع القبلي الي رحاب الأخوة والمحبة والتسامح، إذ ركز علي كثير من المادئ الإنسانية السامية، كنصرة المظلوم وحماية الجار ورعاية الحقوق الخاصة والعامة وتحريم

الجريمة والتعاون في دفع الديات وإفتداء الأسري ومساعدة المدين وغير ذالك من المبادئ الحميدة)
مجلس العلمي الشرعي

قال د.محمد عمارة " لو أن باحثاً في الفقه الدستوري بحث عن أقدم دستور بقي لنا بنص مواده في التراث الإنساني فإن هذا الباحث لن يجد دستوراً سابقاً علي دستور

دولة النبوة التي قامت في المدينة سنة 1هجري، 622 م. فهو أعدل وأقدم أعرق دستور عرفتها التاريخ."

Cumar rx markuu talada qabtay waxaa jiro wax badan oo uu soo kordhiyey waxaana loo yaqaan أولويات عمرwaana hab maamul uu isagu bilaabay.

Sido kale Dowladdii Cusmaaniyiintu inteysan burburin ka hor sanadkii 1876 miilaadii oo waafaqsan 1293 hijriyada waxay qortay dastuur ka koobnaa 119 oo lugu maamuli jirey dowladaas islaamiga ahayd.

Mu'asasada islaamiga ee Azhar iyo Golaha cilmibaarista islaamiga waxaa jirey dastuur ay qoreen oo ay ugu tala galeen iney ku dhaqmaan dowladaha islaamigaa.

( ففي أكتوبر من عام 1977م أوصي المؤتمر الثامن لمجمع البحوث الإسلامية الذي انعقد بالقاهرة بأن تقوم الأزهر الشريف ومجمع البحوث الإسلامية "بوضع دستور إسلامي ليكون تحت طلب اية دولة تريد أن تأخذ الشريعة الإسلامية منهاجاً لحياتها" وقال المجمع في توصيته أنه " يري أن تؤخذ في الإعتبار عند وضع هذا الدستور أن يعتمد علي المبادئ المتفق غليها بين المذاهب الإسلامية كلما أمكن ذالك.) مذكرات الأزهر الشريف

Marka dastuur muslimiinta kuma cusba laakiin waxaa ku cusub dastuuro aysan lahayn oo korka looga keeney isla markaas lugu dhalan iyo dhaqan badeley.

**DASTUURADA SOOGALOOTIGAA**:

Markey burburtay dowladii ugu danbeysey muslimiinta ayna meesha ka baxday awoodii iyo midnimadii dadka muslimka, reer Yurub na ay qabsadeen caalamka islaamka waxay u sameeyeen dastuuro lagasoo minguuriyey maskax shisheeye oo aan ka turjumeyn diinta iyo dhaqanka muslimiinta. Waxay meesha ka saareen dhammaan wixii diin khuseeyey

marka laga reebo arrimaha qoyska iyo erey hal-ku-dhag ah oo ah diinta dalku waa Islaam

Wadamada qaar xattaa xeerka qoyska waa laga saaray sida ka dhacday Soomaaliya.

Dastuuradaas lasoo waaridey waxay isfaham darro, shaki iyo cadaawad kala dhex dhigeen shacabka iyo dowladda, waxaana talinayey madax dhaqan ka dhigtey la dagaalanka diinta iyo ehelkeeda iyo in wadaadka la weel duwo bulshadana laga faquuqo, dalkeennuna wuxuu ku lahaa qeyb libaax in wadaadada hangool lugu qabto.

Wadamada qaar waxay gaartey in dadka xattaa cibaadaadka gudashadooda loo diido.

Sababahaas iyo kuwa kale waxay keeneen in magaca dastuur, dowlad, doorasho iwm ay noqdaan tuke canbaar leh, sido kale raddu ficilkii ka dhashay wuxuu noqdey iney soo baxaan aragtiyo cusub oo miiska dhanka kale u rogey, la yaab malaha qofka marka cadaadiska laga badiyo isaguna wuxuu ku talax tagaa jawaab celinta laakiin ma aha in raddu ficil cadaadis ka dhashay laga dhigo asal taagan oo wax lugu saleeyo, sidoo kale waaqicii jirey hadduu isbadelo waa in jawaab celintuna isla badeshaa maxaa yeeley الحكم يدور مع علنه وجوداً وعدماً

Markii dastuur la qorayo waxaa lugu saleeyaa maslaxada iyi wixii dadkaas dan u ah, waxaana qeyb weyn ka qaata curfiga, xilliga iyo meesha la joogo waxaa halbeeg looga dhiigaa diinta iyo dhaqanka bulshadaas.

Soomaaliya oo ah wadan muslim ah dastuurkii 60-kii loo qoray ilaa hadda kuwa qoran inkastoo ay wax badan ku kala duwan yihiin hadana waxay u badan yihiin wax shisheeye qoray ama ka taliyey oo aan xiriir fiican la hayn bulshada gaar ahaan dadkii mudnaa iney qoraan sida culimada diinta, aqoonyahanka maskaxda fiyow iyo rug cadaaga xog ogaalka ah,

saas darteed ayey Soomaaliya u baahan tahay dastuur adag oo laga soo dhiraan dhiriyey Shareecada Islaamka, dhaqanka wanaagsan kana tujumi kara baahida ka taagan gudaha iyo duruufaha nugu xeeran ayna diyaariyeen indheer garad iyo aqoon yahan Soomaaliyeed oo ay ugu horeeyaan

xeeldheerayaasha diinta si qofwalba loogu xiro dabar ka xannibaya inuu ku shaqeysto suuqa madoow iyo ul mugdi u tuur, si looga badbaado in shisheeye noosoo turjumo dhaqankiisa ama wiilal kalsooni darro ku qaba Islaam aysan noo marin habaabin ama wadaad ilduufay uusan dabeecadiisa diin nooga dhigin.

Waxaan ka hadleynaa dal maalintuu xoroobey la afduubay oo dhaqan Talyaani loo soo turjumey, ka dib na ay Shuuciyad dhaqan badeshey ka dibna burburay ugu danbeyna wadaad xawli ku socda uu dusha ka maray.

Saas darteed ayaan u baahannahay caqli badan, talo badan , dulqaad badan, aqoon badan, waaya aragnimo, farsamooyin dheeraad ah, xarig wareejin, xeelad rag iyo xaajo rog rogid, si loo gaaro natiijo wax ku ool ah oo noqon karta miid kasoo baxday maskax dihin oo la shiilay lagana soo aruurshey ilo muguc ah iyo maraajic biyo kama dhibcaan ah, lagana dhowray dalab iyo deelqaaf luguna cabbirey qawaacidda diinteenna suuban. Dastuur ku fadhiya cadaaladda iyo akhlaaqda Islaamka dastuur u qalma wadan muslim lana socda halka dunidu maanta mareyso tixgelinaya gobolka xasaasigaa ee ay taallo Soomaaliya si loo ilaaliyo maslaxada dadka loogana fogeeyo khataraha imaan kara, waayo wadan walba waxaa haystaa mashaakilkiisa u gaarka ah umad walbana iyadaa taqaan daneheeda. أهل مكة ادري بشعبها

Laakiin haddii Shiishaani Soomaaliya madax looga dhigo ama Soomaali Shiinaha loo magacaabo ma garanayo sida wax noqon karaan.

Dastuurka noocaasi ah sameyntiisa waa midka ay hadda ku hawlan yihiin ururada islaamigaa ee ku guuleystey doorashada wadamada qaarkood ayna rabaan iney dhisaan waxaa loogu yeero.دولة مدنية بمرجعية إسلامية oo ah dowlad u shaqeysa sida dowladaha hadda jira laakiin marjiceedu yahay islaami. ) الدولة الإسلامية هي أول دولة مدنية في التاريخ يخضع فيها الناس لسلطة النظام أو القانون ولا تفتش في الضمائر ولا تملك حرمان أو غفران.) مجلة البيان

Dowladda islaamiga ahna ma aha wax hal midab leh oo aan isbadelin ama dhagax aysan biyuhu dhaqaajin ( الدولة الإسلامية ليس لها صورة واحدة جامدة وإنما عدة صور تدور مع قيم عليا أينما تحققت فثم دولة الإسلام.) د.محمد سليم العوا.

Laakiin wadaadadeenna waxay kaga dhagtay waa daaquud iney yiraahdaan waxkastoo aan iyaga faraxgelin, tillaabo kasta oo dadku qaadaanna xumaanteeda bey arkaan. كأن

القوم لم يروا من حياة الناس وسلوكهم سوي المنكرات و الفواحش.

Muhiimadu ma aha magacyada iyo boorarka ee waa macnaha iyo ujeedooyinka الأسماء لا تغير الحفائق

Tusaale hadii kooxaha Soomaalidu ay ku heshiiyaan 100 qodob oo ay kala qorteen iney wax ku qeybsadaan wadakana ku maamushaan ma waxaa la fiirinayaa magaca warqada iyo afsoomaaliga mise macnaha qodobada iyo waxay keeni karaan.

Islaam waa diin iyo dowlad wada socda mana aha in dowladda iyo diintu ay kala noqdaan labo shey oo col ah difaacna ku kala jira ee waa iney dowladu noqotaa farac u taagan dhaqan gelinta diinta iyo u adeegidda dadka ayna maamulaan dad bulshada ka mid ah oo dadku shaqada u dhiibteen. Waxaan aragney dowladihii ugu horeeyey Islaamka sida ilbaxnimada leh ee ay u maareeyeen maslaxadda dadkii hoos joogey diintana ugu adeegeen. Ninka maanta raba inuu dhiso dowlad aan u ekeyn tii Nebiga csw iyo saxaabada kuwa hadda jirana aan ahayn waxaa is weydiin leh noocee ayey noqon kartaa ma waxay la nooc noqon doontaa talisyadii Kisraa iyo Qeysar mise waxay u muuqaal ekaan doontaa dowladii diineed ee Yurub soo martay qarniyadii mugdiga oo ay baadariyaasha kaniisaduhu dadka adoonsan jireen iyagoo isu muujinaya afhayeenno magaca Ilaahey ku hadla oo aan la khilaafi karin? Jawaabta waxaan u deynayaa akhristayaasha sharafta leh.

Wan ka cudurdaaranayaa hadaan idinku dheereeyey runtii tusaalayaashu aad bey u badan yihiin laakiin luguma soo koobi karo hal qormo iyo labo toona hadda intaas ban ku kaaftoomeynaa.

Mahadsanidin dhammaantiin.

W/Q Abdihakim Diriye

Diiriye303@hotmail.com